AKERSHUS UNIVERSITETSSYKEHUS


**Akershus universitetssykehus HF**
Besøksadresse: Sykehusveien 25, Lørenskog
Postadresse: Postboks 1000, 1478 Lørenskog
Telefon: 67 96 00 00
Epost: postmottak@ahus.no
Ka sii akhri boga **www.ahus.no**


# Ku soo dhawaw Akershus universitetssykehus




= Jidka qabta cusbitaalka
= Jidka dadku maraan
= Istab
= El-bil

1 Hovedinngang
2 Akuttmottak
3 Barne og ungdomsklinikken (BUK)
4 Nye Nord
5 IR – Illegale rusmidler
6 Psykiatrisk mottak
7 Ungdomspsykiatrisk klinikk
8 Ortopedisk akuttpoliklinikk
9 Basecamp
10 Kapell
11 Konsulatet
12 Personalinngang
13 Ole Brumm
14 Voksenhabilitering
15 Behandlingshjelpemidler
16 NKS bygget, Nevrorehabilitering



Akershus universitetssykehus (Ahus) waxa uu qaybo ku leeyahay meelo dhawr ah oo ay ugu weyn tahay qaybta ku taal Nordbyhagen ee degaanka Lørenskog. Buugan yar waxa aad ka heli doontaa warbixin ku saabsan cusbitaalka oo ku anfacaysa, iyo weliba qariirada qaybaha kala duwan ee cusbitaalka iyo meelaha ay ku kala yaalaan.

**Dadka u dhaw – aqoontiisu sareeso**

UiO : Universitetet i Oslo

Haddii shaki kaaga jiro meesha aad aadaysid, waxa aad kaalmo weydiisan kartaa xafiiska cusbitaalka ee ku yaal dhinaca gudaha ee albaabka weyn ee laga soo galo. Xiliga maalin-nimada waxa kula raadin kara goobta aad doonaysid bukaan-kaxeeye (shaqaale cusbitaal). Xafiiska waxa kale oo laga heli karaa kursiga cagoolaha`, kaas oo aad cusbitaalka dhexdiisa lagugu wadi karo.

Caruurta, dhalin-yarada iyo dadka la socda waxa ay ka soo gali karaan kadinka 3 -aad marka ay u socdaan Barne- og ungdomsklinikken (kiliiniga caruurta iyo dhalinyarada ).

Dumarka markaa foolanaya waxa ay ka galayaan kadinka 2 -aad qaybta akuttmottaket.

## Sidee ayaan ku heli karaa?

Dhismaha weyn waxa dhex mara Glassgata. Dhanka midig waxa kaa qaban doona qaybaha bukaan socodka lagu qaabilo. Iridahoodana waxa ku qoran xuruuftan B1, B2, B3 iyo B4. Halka dhanka bidixna ay tahay qaybta bukaan jiifka. Iridahoodana waxa ku qoran xuruuftan S1, S2, S3 iyo S4. Goobta ay Glassgata ku dhamaato waxa ku yaal Barne- og ungdomsklinikken (kiliiniga caruurta iyo dhalinyarada).

## Turjumaan

Haddii aad u baahan tahay turjumaan, waa in qaybta cusbitaalka ee ay quseeso hore ula soo xiriirtid. Turjumaanku waa bilaa lacag.

## Dhiig-qaadid

Haddii dhiig lagaa sii qaadayo ka hor intaadan marin baadhitaanka ama daaweynta, iskaga sii qaad dhiiga goobta ku yaal kala badhka Glassgata, calaamada «Prøvetaking (Dhiig-qaadis)» ayaa ku hor taal. Waxa ay furan tahay saacadaha u dhaxeeya 07:30 - 16:00, maalmaha isniin ilaa jimce.

## Xiliga la is booqan karo

Isniin ilaa Jimce: kl. 18:00 - 19:00. Sabti, axad ama maalmaha ciidaha: kl. 14:00 - 15:00.

Waxa jira cusbitaalka qaybo intaa ay ka dheer yihiin wakhtiyada la is booqan karo, eeg www.ahus.no. Kala balan shaqaalaha cusbitaalka haddii ay jiraan wakhtiyo kale oo aan kuwan ahayn oo aad doonaysid in aad soo booqatid bukaanka, ama haddii aad ku wada imanaysaan dad badan isku hal mar.

Qaybta ay ku nasato hooyada markaa umushay waxa ay leedahay xiliyo booqasho oo gaar u ah qaybtaas. Barne- og ungdomsklinikken (kiliiniga caruurta iyo dhalinyarada) ma laha wakhti booqasho oo go`an.

## Cuntada iyo adeegyada kale

Makhaayada Lyspunktet kafé ayaa ku taal dabaqa labaad ee aaga albaabka weyn, waxa ayna furan tahay isniin ilaa jimce. Cusbitaalku keenaa cunto xalaal ah haddii la weydiisto. Ma jeclin in cunto dabada laga keeno oo loo soo qaato cusbitaalka.

Glassgata waxa ku teedsan adeegyo dhawr ah oo ay ka mid yihiin farmasi, dabakaayo, tima-jare, iyo dukaan iibsha ubaxa.

## Helsetorget

Helsetorget waxa ay u dhex taal Glassgata. Goobtaas waxa aad ka helaysaa warbixin ku saabsan bukaanka iyo ehelada, si bilaash ahna waxa looga isticmaali karaa kambiyuutaro. Cusbitaalku waxa uu leeyahay Internet (wi-fi) bilaa lacag ah.

## Møtepunktet

Møtepunktet (rugta-kulanka) waxa uu dhageestaa, lana taliyaa bukaanka iyo ehelada doonaya cid ay la hadlaan. Waxa goobtaa jooga xubno matala ururada bukaanka. Waxaana ay ku taal goobta Helsetorget.

## Aaga sugida ee bukaanka safraya

Ventesonen (aaga sugida ee bukaanka safraya) waa aag calaamadsan oo ku dhaw Helsetorget -ha halkaas oo aad ku sugaysid gaadiidka gurigaaaga ku geynaya. Halkaas waxa kugu caawin kara shaqaalaha cusbitaalka xiliga maalin-nimada maalmaha shaqada.

## Lærings- og mestringssenteret (Rugta barashada iyo ku xeeldheeraanta)

Rugtu waxa ay u taal aaga Helsetorget -ha. Waxaana lagu qabtaa koorsooyin loo qabto bukaanka iyo ehelada.

## Kiniisada iyo qolka diimaha ee cusbitaalka

Kiniisada iyo qolka diimaha ee cusbitaalka waxa ay ku taal dhanka midig ee Glassgata, marka aad dhaaftid B3. Baadariga cusbitaalka iyo shaqsiyaad ka socda diimaha kale waxa lagala xiriiri karaa tilifoonkan 911 95 977.

## Parkering

Dadka imanaya waxa ay gaadhiga dhigan karaan dabaqa kowaad ee dhismaha parkering -ka, waana lacag. Goobtaasi shan daqiiqo oo socod ah ayay u jirtaa albaabka weyn ee cusbitaalka. Jidka loo soo marayo cusbitaalka uu calaamadsan tahay.

Dadka naafada ahi waxa ay bilaa lacag ahaan gaadhiga ku dhigan karaan aaga albaabka weyn mudo sadex saaacadood ah, waa marka ay calaamada naafada wataan. Dadka aan socon karayn ee gaadhiga soo dhigta dhismaha parkering -ka, waxa ay soo waci karaan tilifoonka 976 30 434 ama waxa ay taaban karaan badhanka tilifoonka ee istabta taala ilinka dhismaha parkering -ka si loogu soo qaado gaadiidka cusbitaalka.

Parkering -ka ku ag yaal albaabka weyn ee qaybaha Barne- og ungdomsklinikken (kiliiniga caruurta iyo dhalinyarada), Ortopedisk akuttpoliklinikk (kiliiniga lafaha ee degdega ah) og Ungdomspsykiatrisk klinikk (kiliiniga maskaxda ee dhalinyarada) way ka qaalisan yihiin qiimaha dhismaha parkering -ka.

## Bas iyo taksi

Basku waxa uu istaagaa albaabka weyn agtiisa. Tagaasiduna waxa ay parkering ku leeyihiin aaga parkering -ka ee u dhaw albaabka weyn. Xafiiskuna tagsi ayuu kuu balamin kara.

## Ardayda ku tababar qaadanaysa Ahus

Ahus waa cusbitaal wax lagu barto, waana aad kula kulmi kartaa arday. Waad dooran kartaa in aynan ardaydu goob joog ka noqon ama qayb ka qaadan marka lagu daaweynayo.

Shaqaalaha markaas jooga shaqada waxa ay isku dayayaan in ay u sahlaan bukaanka doonistiisa, laakiin suuro gal ma noqon doonto in aad diidid in uu ku daaweeyo dhakhtar, kalkaaliso ama shaqaale caafimaad oo kale adiga oo ku saleenaya nooca qofka (nin ama gabadh).

## Xog xafidid

Bukaan ahaan waxa aad leedahay xuquuqo la xiriira ilaalinta xogtaada, sida kaydinta cusbitaalka ee xogtaada caafimaad iyo sida loo isticmaalayo xagtaas. Waxa aad kas ii akhriyi kartaa boga www.ahus.no.